



Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo Tayada Biyaha iyo Tijaabada Biyaha

LA CUSBOONAYSIIYAY Maarso 15, 2017-ka

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay cusboonaysiin doontaa isla markaana joogtayn doontaa liiska su'aalaha iyo jawaabaha inta badan la isweydiiyo ee ku saabsan tayada biyaha ee dugsiyadeena. Su'aalaha waxaa laga gudbin karaa pubinfo@pps.net.

Saamaynta Caafimaad ee Kiimikada Lead ee ku jirta Biyaha la Cabo

Q. Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad ku saabsan saamaynta caafimaad ee kiimikada lead ee ku jirta biyaha la cabo?

A: Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah iyo Maamulka Caafimaadka Oregon waa hay'adaha khibrada u leh isla markaana mas'uulka ka ah ka hortagga iyo wax ka qabashada saamaynta caafimaad ee kiimikada lead. Website-ka waaxda caafimaadka www.multco.us/health/lead-poisoning-prevention ayaa bixiya macluumaad wanaagsan iyo jawaabo ku saabsan macmuulaadka kiimikada lead. Waxay sidoo kale leeyihiin khadka loogu talagalay su'aalaha 503.988.4000.

Qaybinta Biyaha oo Badbaado leh

Q. Waa maxay qorshaha loogu talagalay gaarsiinta biyaha inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2016-17-ka?

A. PPS waxay mishiin 5 gallon ah oo biyaha qaybiya ku rakibtay goobaha dhexe ee dugsi kasta. Dhammaan meelaha biyaha laga cabo "drinking fountains" waa la xiray ama waa la daboolay, laakiin biyaha musqusha iyo meesha wax lagu dhaqo "sinks" way furan yihiin si gacmaha loogu dhaqdo.

Q: Qoysasku caagadaha biyaha 'bottled water' ma soo raacin karaan ardaydooda?

A: Haa, laakiin PPS waxa ay waalidiinta ku dhiirigelinaysaa in ay diraan caagadaha biyaha 'bottled water' oo laga buuxsan karo meel biyaha la cabo oo badbaado leh ku jiraan oo dugsiiga ka tirsan. Biyaha la cabo oo badbaado leh ayaa laga heli doonaa dugsiyada oo dhan kuwaasi oo loogu talagalay ardayda, waaxda iyo shaqaalaha dugsiiga oo dhan.

Baaritaanka Heerka Kiimikada Lead

Q. Waa maxay fursadaha ay PPS siinayso ardayda iyo shaqaalaha si ay u helaan baaritaannada kiimikada lead oo lacag la'aan ah?

A: Gu'gii la soo dhaafay iyo xagaaga oo dhan, PPS waxa ay iskaashi la yeelatay Degaanka Multnomah iyada oo qoysaskana siisay macluumaad ka hadlaya baaritaannada heerka kiimikada lead Degaanka ee lacag la'aanta ah ee Portland oo dhan.

Q. Ma jiraan wax fursado dheeraad ah oo loogu talagalay baaritaanka kiimikada lead?

A: Wakhtigan la joogo, baaritaanka kiimikada lead ee dhiiga ayaa la helayaa isaga oo lacag la'aan ah iyada oo la adeegsanayo Degaanka Multnomah kaasi oo loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 6 jir iyo ka yar tahay iyo haweenka uurka leh. Waxaad ogaan kartaa waxyaabo dheeraad

ah oo ku saabsan fasalada caafimaad ee soo socda adiga oo booqanaya
<https://multco.us/health/lead-poisoning-prevention/test-your-child-lead>.

Q: Halkee ayay qoysasku ka ogaan karaan waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan heerarka kiimikada lead iyo khataraha caafimaad ee ay leedahay?

A: Degaanka Multnomah ayaa hawlgeliya “khadka kiimikada lead” email ayaa loo diri karaa leadline@multco.us iyada oo khadka telefoonka ee macluumaadkana laga wici karo 503-988-4000.

Su'aalaha Kale

Q: Sidee ayaa cuntada dugsiga loo diyaariyaa?

A: PPS waxay dhaqan-gelisay nidaam tuubooyinka biyaha lagu nadiifiyay horraantii Oktoobar, 2016-kii. Tani waxay keentay in jikooyinka aan leenahay ay si caadi ah dib ugu bilaabaan diyaarinta cuntada oo badbaado leh.

Q: Roosevelt, Franklin, Grant iyo Faubion ma helayaan tuubooyin biyaha qaada oo cusub oo aan lahayn kiimikada lead iyada oo ay qayb ka tahay dib u cusboonaysiinta dhaqaalaheeda lagu bixiyay Maalgelinta daymeed?

A: Haa.

Q: Waxyaalaha ka soo baxa beeraha dugsiga (ee lagu waraabiyo biyaha dugsiga) si badbaado leh ma loo cuni karaa?

A: Cunista waxyaalaha ka soo baxa beertu waa doorasho caafimaad leh oo loogu talalay dadka oo dhan. Beeraha cuntada ee dugsiga waa kuwo la aqbali karo isla markaana ay dhiirigelinayso Degmadu si loo kobciyo fursadaha waxbarasho ee dheeraadka ah ee ardayda iyo sidoo kale sii wadida ka qayb qaadashada bulshada iyo hababka wax loo qabanayo oo joogto ah.

Dhawaan, Maamulka Caafimaad Oregon ayaa dib u eegis ku sameeyay cilmi-baari saynis oo ku saabsan badbaabada wax beerida carrada ay ku jiri karto kiimikada lead. Kuwa ugu badan ee gacanta ka gaysta carrada ay ku jirto kiimikada lead waa waxyaabaha ay ka mid yihiin qaybaha yar yar ee rinjiga ee haraaga ah iyo buska/boorka. Cilmi-baaristu waxa ay muujisay in qiyaasta kiimikada lead ee soo gaartay carrada ee biyuhu keeneen ay tahay mid yar marka la barbardhigo qiyaasta kiimikada lead ee hore ugu sii jirtay carrada oo ah biro heerar kala duwan leh oo isku qasan. Guud ahaan, dhirta beerta ka baxdaa ma nuugto/qaadato qiyaaso la taaban karo oo ah kiimikada lead. Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in la dhaqo carrada oo dhan isla markaana buska/boorka laga tirtiro khudaarta iyo gacmaha marka wax la beero, iyada oo carrada iyo busku/boorku yihiin kuwa ugu badan ee ay suurto galka tahay in ay wasakhda kiimikada lead u keenaan waxyaalaha ka soo baxa beeraha.

Sida ku cad macluumaadka laga helay Maamulka Caafimaadka Oregon, beeraha dugsiga waxaa laga yaabaa in lagu waraabiyo biyo laga soo qaado tuubooyinka biyaha “hose bibs” ee dugsiga iyada oo aan la eegayn qiyaasta ay sheegayso in uu yahay heerka kiimikada lead. Degmadu waxay dadka ku dhiirigelinaysaa in biyaha laga soo qaadayo tuubooyinka biyaha “hose bibs” la furo oo ay socdaan 1-2 daqiiqo ka hor inta aanan la bilaabin waraabinta beeraha si tuubooyinka biyaha “hose bibs” looga nadiifiyo wixii biyo ah ee dhex fadhiya.

Waxyaalaha ka soo baxa beeraha ee loogu talagalay in lagu cuno maqaayada dugsiga waa in marka hore bannaanka lagu soo dhaqaa si looga saaro waxyaalaha wasakhda ah. Cuntada waxaa markaasi ka dib si buuxda u dhaqi doona shaqaalaha Adeegyada Nafaqada iyaga oo ku dhaqaya tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” oo leh qiyaas ka hoosaysa heerka EPA ee loogu talagalay kiimikada lead iyo diyaarinta waxyaalaha loogu talagalay in la cuno. Haddii waxyaalaha ka soo baxa lagu cuni doono meel kale oo ka tirsan dhismaha dugsiga oo aan ka ahayn maqaayada, barnaamijyada beerta loogu talagalay waxay qabanqaabo la samayn doonaan shaqaalaha Adeegyada Nafaqada si loo isticmaalo meesha wax lagu dhaqo “sinks” wakhtiyo ka baxsan marka cuntada la diyaariyo. Haddii waxyaalaha ka soo baxaa ay yihiin kuwo halaabay oo dhismaha dugsiga laga qaadayo, ha ku dhaqin qasabada/tuubada biyaha ee beerta.

Waaxda Waxbarashada ee Oregon Barnaamijkeeda Badbaadada Cuntada Beerta Dugsiga wuxuu ku talinayaa in isuduwayaasha barnaamijka cuntada beertu ay haystaan kaarka ka shaqaynta cuntada gobolka. Dhammaan ardayda/shaqaaluhu waa in ay si buuxda gacmaha ugu dhaqdaan saabuun iyo biyo ka hor inta aanay soo goosanin cuntada si loogu adeego dugsiga. Inta lagu jiro goosashada cuntada, gacmaha dib u dhaqo ka dib marka la nasto, musqulaha la aado, la hindhiso, la qufaco, la taabto qashin ama lacag, ama mar walba oo ay gacanta soo gaarto carradu. Arday ama shaqaale KASTA oo jiran maaha in uu ka qayb qaato marka cunta la soo goosanayo si aanay u faafin bakteeriyada ama fayrasyada keenaya jirooyinka cuntada laga qaado.

Haddii aad dhisayso beer cusub, fadlan la shaqee shaqaalahayaga Maamulka Mashruuca.

Qorshaha Baaritaanka Kiimikada Lead

Q: Waa maxay xaaladda ay uu ku sugan yahay baaritaanka kiimikada lead ee PPS?

A: Muunad laga qaadayo qasabada/tuubada biyaha qabow ka soo baxaan ee degmada ayaa la dhamaystiray iyada oo dhammaan natiijooyinka muunadaha hore ee la qaaday ee xarafka ka bilaabma “A” si gaar ah loo soo geliyay internet-ka. Waxaan rajeynaynaa in mustaqbalka dhow, in aanu warbixin kama dambaysa ah, oo faahfaasan ka helno xarunta TCR taasi oo loogu talagalay dhammaan dhismayaasha baaritaanka lagu sameeyay, iyada ay la socoto gunaanadka baaritaanka buuxa ee la sameeyay, xogta iyo sixitaanka wixii qaladaad ah ee ku yimid warbixintii hore ee hordhaca ahayd. Marka warbixinta la soo dhamaystiro waxaan ka dhigi doonaa mid ay helaan dhammaan qoysaska iyo dhaqaalaha PPS.

Muunad labaad ee “B” ayaa sidoo kale la qaaday iyada oo loo isticmaalay in ay taageero ka geysato aqoonsiga halka ay kiikimada lead ka imaanayso (marka la isku eego tuubooyinka biyaha qaado “pipes” iyo tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures”). Koox saddexaad oo madax bannaan oo baaritaan ku samaysay labada muunadoodba, isla markaana raacisay macluumaad kale, ayaa talo ku soo jeedisay hagaajinta habka la isticmaalo hada, oo ay ka mid yihiin:

- a. Bedelaada tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures”;
- b. Bedelaada tuubada biyaha qaada;
- c. Saarida dhammaan faltarada biyaha shaandheeya;
- d. Cusboonaysiinta hab maamuuska iyo nidaamyada si loo xaqiijiyo in shaqo badbaadada leh laga qabto dhammaan tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” sida nadiifinta;
- e. Abuurista diiwaano rasmi ah oo lagu kaydiyo xogta tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” oo loogu talagalay in lagula socdo wixii taariikh ah ee la xiriirta dayactirka iyo wixii cabbiraado ah ee la sameeyo.

Dhammaan meelaha biyaha laga cabo “drinking fountains” waa la daboolay ama waxaa laga dhigay kuwo aan shaqaynayn, iyada oo lagu bedelay mishiin biyaha qaybiya oo la qaadi karo si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda iyo shaqaalaha ay haystaan biyo la cabo oo badbaado leh. Hab maamuus la raaco ayaa sidoo kale la dejiyay si loo xaqiijiyo in biyaha loo isticmaalayo in a lagu diyaariyo cuntada jikooyinku ay yihiin kuwo badbaado leh.

Calaamado ayaa lagu dhejiyay albaabada laga soo gelo ee dhammaan goobaha aan ahayn meelo biyaha laga cabo “non-fountain” (musqulaha, shaybaarka, fasallada, iwm.) kuwaasi oo tilmaamaya in ardayda iyo shaqaaluhu ay tahay in aanay ka cabin meesha wax lagu dhaqo “sinks” ama meelaha kale tuubada halka biyuhu ka soo baxdo “fixture” Biyaha aan la cabayn in loo isticmaalo sida gacmaha oo lagu dhaqso waa mid badbaado leh.

Q: Baaritaan ma lagu sameeyay qasabada/tuubada biyaha iyo meelaha biyuhu ka soo burqadaan “fountains” ee bannaanka ku yaala?

A: Qasabado biyuhu ka soo baxaan ayaa lagu xiray dhismayaasha PPS ee baaritaanka lagu sameeyay iyada oo natiijooyinka ka soo baxayna la raaciyay natiijooyinka u gaarka ah dugsiga.

Q: Dugsiyada gaarka ah sidoo kale baaritaan ma lagu sameeyay?

A: PPS waxay baaritaan ku samaysay biyaha dhammaan dhismayaasheeda. Dugsiyada gaarka ah ee ay isku meel ku yaalaan dhismayaasha dugsiga iyo xarumaha ay PPS leedahay waxaa xagaagan aan ku jirto baaritaan lagu sameeyay tayada biyaha iyada oo natiijooyinkana la soo dhejiyay. Dugsiyada gaarka ah ee aan ku oolin dhismaha PPS iyaga laguma darin, laakiin ardayda dhigata dugsiga gaarka ah waxay awoodeen in ay ka qayb qaataan baaritaankii heerka kiimikada lead.
